



Baro talada

1. **Weydii su'aalo si aad u jeclaato buugga:** Fiiri jaldiga buugga. Fiiri dhowr bog. Ka hadal waxa ka dhici kara gudaha buugga.
2. **Weyddii su'aalo ku saabsan erayada buugga ku jira:** Markuu jiro kelmad yara adag, ka hadal sida loo codeeyo. Ka hadal waxay ereyada micnahoodu yihiin.
3. **Weydii su'aalo ku saabsan waxa ka dhacaya buugga dhexdiisa:** Markaad kahriyeyso, hako oo hadal. Marka uu buuggu dhammaado, ka hadal wixii dhacay ama waxaad baratay.
4. **Weydii su'aalo ku saabsan sida loogu akhriyo buugga sida sheeko ka sheekeeye:** Ugu layli akhriska ereyada si habsami leh oo u akhri weedhaha si shuucuurta muujineysa.

Maxaa loogu baahn yahay taladan?

Ka hadalidda buugaagta ayaa dariiq sahlan oo lagaga caawiyo ilmahaagu inuu barto erayo badan oo u ka fikiro wuxuu akhrinayo. Intaa waxa u dheer, si fiican ayaad isku baranaysaan!



Weydii ilmahaaga

Loogu talagalay carruurta da'da sii yar

- Maxaad u malayn inuu buuggani ku saabsanaan doono? Maxaa ku jira buugga ee aad ugu maleysay taas?
- Ereygani wuu adag yahay. Aan qun yar socno. Maxaa xarfo ah ee aad aragtaa?
- Maxaa sheekada ka dhacay marka ugu horreya? Iga dhex tus buugga.

Loogu talagalay carruurta sii wayn

- Waa maxay wax aad ka baran karato marka aad buuggan aad akhriso?
- Maxaad u malayn inuu dhici doono marka xiga? Sabab?
- Waa maxay xuruuf isku dar aad ka dhex arki karto ereygan?
- Aan dib u akhrino kan markii ugu dambeeyay oo aan isku dayno inaan innan ku dayano sida sheeko k sheekeeyaha.



U layli si ciyaaritan oo kale ah

Ku martigali naadi buug saaxiibbadaada iyo qoyskaaga guri qof kale ama maktabadda. U raaci cunto iyo xaflad!

Ku martiqaad qof kasta inuu keeno ugu yaraan hal buug carruureed oo ay rabaan inay akhriyaan. Wuxuu noqon karaa buug ay horay u akhriyeen oo ay jeclaadeen ama buug kale ayuu noqon karaa. Haddii carruurtaadu ay sii yar yihiin, ku ekow buugaagta sawirka leh. Kadibna buugaagta is dhaafsada.

Dhowr toddobaad ama in ka badan, isku soo noqda oo ka wada hadla buugaagta. Waxaad gacan ka geysan kartaa inuu wada sheekaysigu sii socoto adiga oo weyddiia:

- Markaa muxuu buuggani ku saabsanaa?
- Muxuu qaybtaa ugu wanaagsani? Sabab?
- Waa maxay buugaagta ama sheekada kale ee ay ku xsusuusinayso?

